

# VOICES OF MENINGITIS™

A Meningococcal Disease Prevention Campaign  
from the National Association of School Nurses

In collaboration with Sanofi Pasteur

## Ogow xaqiiq Jirta

### Waa maxay xanuunka qoorgooyaha?

Xanuunka qoorgooyaha waa mid halis ah waxaana keena bacteriya ama jeermis kaas o dila sanad waliba 800 ama 1200 oo qof oo American ah. Inkastoo ay dhif dhif atahay, xanuunka qoorgooyaha wuxuu keeni karaa in uu maskaxda dhiig ku furo kadibna xubka maskaxda barar ku yimaado ama laf dhabarta; dhiiga oo infekshan ku yimaada; ama uu keeno nimooniya. Waxaa loo helay talaal sanado ka hor waana mid bad qaba oo wax tar leh oo looga hortagi karo qatarta ba'ani ee uu leeyahay xanuunkani xun.

### Yaa qatar ugu jira in uu qaado xanuunka qoorgooyaha?

Inkastoo xanuunkani ku dhici karo da waliba, carruurta, dadka waa weyn iyo waliba dhalinta yaryar, hadana waxaa qatarta ugu weyn ugu jira inn ay qaadaan qoorgooyaha dadka jira 65 sano iyo wixii kasii weyn.

### Sidee lagu qaadaa xanuunka qoorgooyaha?

Bacteriyada keenta xanuunka qoorgooyahaha (meningococcal disease) waxaa lagu kala qaadaa neefsashada iyo waliba dheecaanka oo isgaara. Hawlaha caadiga ee maalin waliba la sameeya ayaa fududeyn karta kala qaadida, sida shumiska, maacuunta oo la wadaago iyo biyaha quraaradaha; iyo waliba kuwada noolaashaha meel ciriiri ah sida kuleejo oo kale. Xubno daaca ayaa sidoo kale waxa uu keeni karaa qoorgooyaha, waxaa suuro gal ah in uu daciifiyo awooda difaaca jirka.

### Waa maxay calaamadaha lagu garto qoorgooyaha?

Xanuunka qoorgooyaha waa ay adagtahay sida lagu garto, qaasatan marka uu horleeyahay, sababtoo ah calaamadihiisa waxa ay u egyhiina kuwa uu keeno viraska guud. Balse xanuunkani wuxuu uga duwanyahay kuwa kale, xanuunkani wuxuu ku faafaa si dhaqsa ah wuxuuna kuugu dili karaa 1 maalin oo kaliya. Calaamadihiisa waxaa ka mid ah xumad saa'id ah, madax xanuun, qoor xanuun, wareer, madag, daal, iyo finan.

### Maxaa dhici kara hadii uu kuugu dhoco xanuunka qoorgooyahaya?

Xanuunka qoorgooyaha waa mid qatar ah wuxuuna sababi karaa geeri ku timaada qof yar oo caafimaad qaba mudo 1 maalin gudeheed marka calaamadihiisa lagu arko, Balse waa ay yartahay arintaasi. Waxaa u dhinta xanuunka qoorgooyaha 10 ilaa 15 boqolkiiba 800 ilaa 1200 ee qof ee American ah ee la ila daran xanuunkani. Ugu yaraan 5tii qofka ee ka bad-baada xanuunkani 1 qof oo ka mid ah ayuu ku reebaa xaalad caafimaad daro, waxaana ka mid ah: in qofka laga gooyo gacmaha, lugaha, faraha ama suulasha lugaga, dhibaatooyin xaga maskaxda; dhagool nimo iyo dhaabacyo xaga kaliyaha.

### Sidee canugaaga uga caabin kartaa in uu ka bad-baado xanuunka qoorgooyaha?

Macluumaadka Xarunta Xakameynta iyo Ka hortaga Xanuunada (CDC) waxa ay muujinayaan in uu cudurka qoorgooyaha uu ku dhici karo dhaliinyarta iyo waliba dadka waa weyn inta u dhexeysa 16 iyo 21 sano. Inkastoo cudurkani uu yahay mid dhif dhif ah, waxa uu hadana sababi karaa xaalada qatar ah, curiyaannimo aan laga kicin iyo waliba geeri, sidaas darteed waxaa muhiim ah in laqaado tilaabo waliba ee looga hortagi karo.

Si lagaaga caabiyo ka hortaga xanuunka qoorgooyaha, guddiga talabixinta ka hortaga xanuunada iyo qaab dhaqameedyada talaalada (ACIP) waxa ay kuugula talinayaan in ay dhalinyarta u dhexeysa 11 ilaa 18 sano ay qaataan ( hal dose oo talaalka xanuuni ay qaataan marka ay jiraa 11 samo ama 12 sano caruurta marka hore qaata talaalkaasi waa in ay qaataan talaal kale ee xooginya kii hore marka ay gaaraan 16 sano).

Qaadashada talaalka xoojiyaha waa mid ay ku talineyso xarunta xakameynta curudarada (CDC) balse gobolo badan ayaan looga baahneyn, waana muhiim in la qaato talaalada laguula talinayo. Talaalka dheeriga ee xoojiya waxa uu dhalinta yar-yar u yahay difaac, wuxuuna ka difaacayaa qatarta uu xanuunka qoorgooyaha ku sii xoogeysanlahaa.

Kala hadal kal kaalisada caafimaadka iskuulka ee canugaaga ama dhaqtar qaababka looga hortagi karo xanuunka qoorgooyaha (meningococcal meningitis) ama booqo [www.Facebook.com/VoicesofMeningitis](https://www.Facebook.com/VoicesofMeningitis) for more information.